

Adeegyada ururada

Moniheli waxay taageertaa horumarinta ururada dhaqamada kala duwan iyo iskaashiga ay isla wadaagaan. Dhamaan howlaheena, waxaan ku muujineynaa ku dhaqanka shabakada dhaqankooda wanaagsan iyo khibradooda. waxaa lagu heli karaa af Finnish ama af Ingiriisi. Intaas waxaa sii dheer, waxaan ku bixinnaa adeegyo taageero oo ku baxaysa af Faransiis sidoo kale waa nagala soo xiriiri karaa af Soomaali iyo af carabi. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyadeena xaga hoose.

Awood-dhisid

Moniheli waxay bixisaa tababaro, kooxaha wax barashada isku faca ah iyo fadhiyo macluumaad ah oo lagu taageerayo horumarinta ururada xagga maamulka, qorshaynta mashruuca, lacag ururinta ama xiriirka. Ururada xubnaha waxay sidoo kale wax ku baran karaan iyagoo adeegsanaya waxyaabaha ku qoran bogagga xubinta. Bogagga xubinta waxaa ka mid ah hagitaanno iyo tilmaamo, tusaale, jadwalka taariikhda dalabka deeqaha, qalabyo loogu talagalay qiimeynta hawlhooda, iyo talooyinka lagu dhiirrigelinayo arimahan.

La-talinta iyo jilicsanaanta

Waxaan kula talinaynaa ururada si ka fool ka fool ah, taleefan, iyo emayl. Waxaan ka caawinnaa ururada inay u dhaqmaan si sharciga waafaqsan, una codsanno deeqo lagu horumariyo howlaha iyo inaan u helno lamaanayaal. Markaad codsato waxaan kuu diyaarin karnaa kalfadhiyo oo lala yeelanayo ururada doonaya inay horumariyaan qorshayaashooda mashruuca.

Meelo loogu talagalay waxqabadyada

Ururadu waxay kireysan karaan qolka kulanka Moniheli ee Kalasatama Helsinki, waxay u isticmaali karaan shirarka, tababaro ama koorsooyin. Ururada xubnaha ka ah Moniheli waxay u isticmaali karaan booska bilaash(ayagoon waxba bixineyn). Si aad wax dheeraad ah uga ogaato shuruudaha qolka iyo ballansashada waqtiga jadwalka yaala, taabso badhanka hoose. Waxaan sidoo kale haynaa liiska goobaha kale ee munaasabadaha ee ay heli karaan ururada si ay u abaabulaan waxqabadyadooda.

Naadiyada Ururada

Ururada dhaqamada kala duwan wey is baran karaan, la wadaagi karan dhaqankooda wanaagsan, kuna baran karan la hawlgalayaasha mustaqbalka ee dhacdooyinka Naadigaa ee Ururada Moniheli. Naadiyada Ururo Walba 'waxaa lagu abaabulaa mowduucyo kala duwan oo la xiriira howlaha ururada (tusaale ahaan, mowduucyada 2020 waxay ahaayeen wanaagga ragga sida, xaga caafimaadka maskaxda, taageerada shaqada si loo taageero habka shaqada ururka). Naadiyada Ururada way u furan yihiin qof walba. Waxaad kaga qayb geli kartaa luqada Finnish, luqada Ingiriisi, iyo Khadka tooska ah (onlanka).

Xoojinta iskaashiga

Waxaan bixinnaa barnaamijyo kala duwan iyo fursado ay ururada xubnaha ka ah iyo ururada kale ee dhaqamada kala duwan ay ku xiriiri karaan (waxaan u fidinaa kooxaha facebooga iyo whatsappka oo gaar u ah ururada xubnaha Moniheli). Waxaanu sidoo kale toosh ku ifinaa shaqada wanaagsan ee ururada dhaqamada kala duwan ey ka qabtaan kanaaladeena isgaarsiinta kala duwan, taas oo gaareysa kumanaan taageerayaal. Waxadna nagala socon karta khadka tooska: **Facebook, Twitter, Instagram, iyo joornaalada.**

Adeegyada ururada xubnaha ka ah

Fadlan ogow in howlaha Moniheli ay u furan yihiin qof walba, laakiin ururada xubnaha ka ah waxay si aad ah ugu xiran yihiin Moniheli iyo mashaariicdeeda iyo waxqabadyadeeda (Katto program, OmaPolku project, iyo Terkku project). Kaliya ururada xubinta ka ah Moniheli, waxay ku helaan waraaqaha faa iidada u ah emayl ahaan, waxay marin uhelaan Boggeena xubinta iyo agabkeeda, waxay saameyn ku yeelan karaan mustaqbalka shabakadeena, tusaale ahaan, sida xubnaha guddiga waxayna ka dalban karaan Moniheli deeqda howlahooda.

Deeqda Moniheli

Moniheli waxay taageertaa ururada xubinta ka ah howlahooda. Si kor loogu qaado isdhexgalka, ladnaanashada, iyo ka mid noqoshada muhaajiriinta. Waxayne kuu taageerta deeqda Moniheli. Kuwa qaata deeqaha waxay leeyihiin fursad ay ku bartaan qorshaynta mashruuca iyo maaraynta. Sanadka 2020, Moniheli waxay uqeybiyeen 75 000€ 20 mashruuc oo aad ka akhrin kartid maqaalkan. Kaliya ururada xubnaha ka ah Moniheli, ee ku soo biiray sanadkii hore oo aan helin deeqda 'STEA' ayaa dalban kara deeqda Moniheli .Wax codsiga wa sanadkiiba hal mar.

[Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan xubinnimada waxaad ka akhrisan kartaa halkan .](#)